



Shaqaalaha Ajnabiga ah Iyo Lambarka Bulshad

Miiska ku jira

Maxaa la iiga baahan yahay si aan uga shaqeeyo Mareykanka?	1
Sidee ayaan u codsan karaa Lambarka Bulshada?	2
Intee ayey qaadanaysaa in aan helo Lambarka Bulshada?	3
Miyaa la iga doonayaa in aan heysto lambarkeyga ka hor inta aanan shaqo bilaabin?	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	3

Lambarka Bulshada waxaa loo isticmaalaa in dawladda lagu soo wargeliyo dakhliga qofka soo gala go'aana looga gaaro in qofku xaq u leeyahay macaashka Lambarka Bulshada. Waxa aad u baahan Lambarka Bulshada si aad shaqo u hesho, lagu siiyo macaashka Lambarka Bulshada, ama adeegga dawladdu bixiso.

Haddii aad is ku meel gaar u joogto Mareykanka, goobta shaqada waxa ay ku weydiinayaan Lambarkaaga Bulshada. Guud ahaan, dadka aan heysan dhalashada oo ay u ogolaatay Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Department of Homeland Security, DHS) in ay dalka ka shaqeyn karaan oo kaliya ayaa heli kara Lambarka Bulshada.

Inkasta oo ganacsiyada qaarkood, sida bangiyada iyo shirkadaha deynta bixiya, ay ku weydiin karaan lambarkaaga, khasab kuguma aha in aad siiso. Adeeg badan ayaa lagu fidin karaa adiga oo aan heysan Lambarka Bulshada, oo ay ka mid yihiin ogolaashaha wadidda gaadiidka.

Maxaa la iiga baahan yahay si aan uga shaqeeyo Mareykanka?

Ugu horeyn, waa in aad keentaa caddeyn la xiriirta sharciga aad waddanka ku joogto iyo ogolaashaha shaqada ee Mareykanka. Ka dib, waxa aad codsanaysaa maamulka Lambarka Bulshada kaarka iyo Lambarka Bulshada.

Sidee ayaan u codsan karaa Lambarka Bulshada?

Codsiga kaarka iyo Lambarka Bulshada waa lacag la'aan. Si aad Lambarka Bulshada ugu codsato Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaankaaga:

- Buuxi codisga kaarka Lambarka Bulshada ;
- Adiga oo keenaya warqadaha asalka ah ee ilmaha adiga oo caddeynaya:
 - Warqadda Aqoonsiga.
 - Ogolaashaha shaqada; iyo
 - Da'da
- Ka dib, xafiiska keen ama boostada ku soo dir codsigaaga iyo waqradaha la socda xafiiska degaanka ee Lambarka Bulshada.

Aqoonsiyada oo dhan waa in ay noqdaan asalkii ama nuqul laga soo shaabadeeyey hay'adda soo sartay. Ma ogolaaneyno nuqul ama nuqul leh shaabadda xaqiijiyaha (nootari) Ma ogalaan karno caddeyn muujineysa in aad codsatay aqoonsiyada.

Waxaa laga yaabaa in aan hal qoraal ama aqoonsi u adeegsano labo ujeedo. Tusaaale ahaan, waxa aan u isticmaali karnaa ogolaashaha shaqada ee DHS caddeyn ahaan iyo sharciga shaqada. Shaahada Dhalashada ama Baasaboorkaaga ayaa caddeyn u noqon kara da'daada. **Hase yeeshee, waa in aad keentaa ugu yaraan laba aqoonsi.**

Aqoonsiga iyo ogolaashaha shaqada

Si aad u caddeeyso aqoonsigaaga iyo ogolaashaha shaqada, waa in aad na tustaa caddeynta sharciga aad wadanka ku joogto iyo baasaboorka waddankaaga oo aan dhicin. Aqoonsiyada la ogol yahay waxa ka mid ah:

- Baasaboorka waddankaaga oo aan dhicin oo ay ku taalo shaabadda aad wadanka ku soo gashay oo muujinaya darajada shaqada.
- Foomka I-551, *Permanent Resident Card* (kaarka deganashaha rasmiga ah);

- Foomka I-94, *Arrival/Departure Record* (kaarka gelitaanka/Ka bixitaanka waddanka) oo muujinaya ogolaashaha shaqada ee ee DHS; ama
- Foomka I-766, *Employment Authorization Record* (Warqadda Ogolaashaha Shaqada, EAD, ogolaashaha shaqada ee ay soo saartay DHS).

Is weydaarsiga booqashada Dadka heysta fiisaha A J-1 ee booqanaya waa wataan foomka DS-2019, *Certificate of Eligibility for Exchange Visitor Status* (Caddeynta Booqasho Isweydaarsiga). Waxaa intaas dheer, ardayda J-1, ardayda tababarka ku jirta, iyo booqdayaasha caalamiga ah waa in ay soo bandhigaan warqadda martiqaadka si aad u cedeeyso in aad shaqo heysato. Warqadda waa in ay ku qoran tahay warqadda rasmiga ah ee marti geliyaha ee ogolaashaha shaqada.

Ardayda caalamiga ah Ardayda heysata F-1 ama M-1 waa in ay soo bandhigaan Foomka I-20, *Certificate of Eligibility for Nonimmigrant Student Status* (Caddeynta Ogolaashaha Shaqada ee Ardayda Ajnabiga Ah). Waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad keento caddeymo dheeraad oo muujinaya ogolaashaha shaqada. Macluumaad dheeraad ah ka akhri *Ardeyda Caalamiga ah ee Waxbaashada U Jooga Iyo Lambarka Bulshada* (Publication No. 05-10181-SO).

Da'da

Waxaa waajib kugu ah in aad keento shahaadada dhalashada ee wadamada kale haddii aad heysato ama ku heli karto 10 cisho gudahood. Haddii aanay sidaas aheyn, waxaa kale oo aan tixgelin doonaa aqoonsiyada kale sida baasaboorkaaga ama aqoonsi kale oo ay bixisay DHS caddeyn ahaan da'daada.

Intee ayey qaadaneynsaa in aan helo Lambarka Bulshada?

Waa in xaqiijinaa aqoonsaiyada DHS ka hor inta aan lagu sameyn Lambarka Bulshada. Ka dib marka aan xaqiijin ka helno DHS, waxa aan boostada kuu soo dhigeynaa kaarka Lambarkaaga Bulshada. inta badan, waxa aan si dhaqso ah uga xaqiijin karnaa aqoonsigaaga barta internetka ee DHS. Haddii aad aqoonsiiaaga laga xaqiijin karin barta internetka, waxaa laga yaabaa in DHS ay ku qaadato dhawr todobaad. Waxaanu si hoose ula shaqeyneynaa DHS si aan yareyno dib u dhaca.

Miyaa la iga doonayaa in aan heysto lambarkeyga ka hor inta aanan shaqo bilaabin?

Kuma weydsiisaneyno in aad heysato Lambarka Bulshada ka hor inta aadan shaqo bilaabin. Hase yeeshee, Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS) waxa ay shaqaalaha waajib kaga dhigtaa in ay isticmaalaan Lambarkaaga Bulshadasi ay u soo sheegaan mushaharka lagu siiyo.

Inta aad sugayso Lambarkaaga Bulshada, goobta shaqada waxa ay isticmaali karaan warqadda aan ku siino oo muujineysa in aad codsatay lambarka, iyo caddeynta socdaalka oo muujineysa ogolaashaha shaqada ee Mareykanka.

Goobaha shaqadu waxa ay macluumaadk ka heli kartaan barta internetka ee www.socialsecurity.gov/employer/hiring.htm

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawl-gabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow